# Vascular Ring—Double Aortic Arch
## Xididka Halbowlaha Labada Buundo




**Wadne caadi ah**



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404


© 2012 The Children's Heart Clinic

**Xididka Wareegsan**
Vascular Ring

Xididka wareegsan waa nooc ka mid ah xanuun wadne oo lagu dhasho oo cilladaha aan caadiga ahayn ee buundada xididka ama waa dhif, pulmonary artery (halbowlaha sambaka ama PA), ayaa keena calaamadaha neefsashada ama dhibaatada quudinta oo sababtu waa cadaadis ama xannibaad ku timaadda hawamareenka ama hungurimareenka. Wadnaha ilmaha uurka ku jira oo laba laamood oo siman oo ah halbowlaha. Qeybo ka mid ah buundada halbowlaha ayaa dib u noqda bisha labaad ee ilmaha uurjiifka, sida caadiga ah waxay keentaa in buundada halbowlaha bidix oo leh saddex laamood oo halbowle ah: halbowlaha aan nooleyn, halbowlaha xawlmariidka ee bidix, iyo halbowlaha kalxanta bidix hoose. Halbowlaha dhuunta wuxuu ka yimaadaa halbowlaha sambabka bidix ilaa halbowlaha weyn, oo u dhow asalka kalxanta bidix. Xididdada wareegsan ee dhiigga waxa uu yimaadaa marka ay jiraan dibu-dhac aan caadi ahayn oo qeybo ka mid ah labada laamood ee halbowlaha weyn.

Xididdada wareegsan waa mid dhammeystiran ama mid aan dhammeystirneyn. Xididdada wareegsan ee dhiigga waa cilladaha aan caadiga ahayn ee halbowlaha weyn ama halbowleyaasha sambabka kuwaas oo goobaabin ku sameeya hunguriga iyo hawamareenka. Wareegga xididka ee dhiigga ee aan dhammeystirneyn waa hunguriga iyo hawamareenka, laakiin ma noqdaan goobaabin dhammeystiran oo ku wareegsan. Wareegga xididka ee dhiigga waxay ku dhacdaa in ka yar 1% ilmaha qaba xanuun wadne oo lagu dhasho. Waxaa jira dhowr nooc oo ah wareegga xididka ee dhiigga. Labada nooc ee ugu caansan ee wareegga xididka ee dhiigga waxaa lagu sifeeyaa.

**Noocyada:**

- **Halbowlaha Labada Buundo:** Buundada bidix iyo midig jiri karta, oo keeneysa goobaabinta dhammeystiran oo ku wareegsan hawamareenka iyo hungurimareenka. Buundad halbowlaha midig ayaa inta badan ka weyn tan halbowlaha bidix. Buundada midig waxay soo saartaa halbowlaha xawlmariidka midig iyo kan midig iyo buundada bidix waxay soo saarayaan halbowlaha xawlmariidka ee bidixe iyo kan bidixe ee kalxanta. Buundada labada xidid ee dhiigga waa nooca ugu badan, oo ku dhaca 40% ilmaha laga helo halbowlaha xididka wareegsan.
- **Buundada Halbowlaha Midig ee Seedda Halbowlaha Bidixe:** Xanuunka noocan ah, halbowlaha bidix ee kalxanta ayaa si aan caadi ahayn uga yimaada xididka hoos u socda iyo meelo ka dambeeya hungurimareenka iyo seedda isku xirta halbowlaha sambabka bidix iyo halbowlaha weyn ee hoos u socda. Noocyada waxay sameeyaan goobaabin dhammeystiran oo ku wareegsan hungurimareenka iyo hawamareenka. Waxaa xusid mudan, 25% ilmaha qaba xanuunka wadnaha midabkiisu beddelmo ee halbowlaha midig waxay sababa seedaha xididka bidix. Buundada halbowlaha midig iyo seedda halbowlaha waa kan labaad ee ugu badan, oo wuxuu ku dhaca 30% ilmaha laga helo halbowlaha xididka wareegsan.

**Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- Badanaaba dhallaanka iyo carruurta waa calaamad la'aan.
- Carruurta laga helo halbowlaha buundada ah waxay yeeshaan calaamado degdeg ah oo ka sii dara marka loo eego carruurta leh buundada midig ee halbowlaha seedda bidix.
- Dhibaatooyinka neefsashada iyo quudinta waa ay ku dhacaan dhallaanka.
- Oofwareen ayaa ku dhici jiray.
- Wadnaha ayaa la baarayaa, haddii uusan jirin xanuun lagu dhasha oo kale oo ah wadnaha.
- Calaamadaha neefmareenka ayaa ka sii daraya quudinta ama infakshanka neefmareenka.
- Carruurta waaweyn waxaa lagu sifeeyaa in cuntada "ku mergadeen" markay wax laqayaan ama ay u qufacaan / oo ay saxanayaan markay wax cunayaan.

**Cilladsheegid:**

- <u>Baarista baariyum ee hungurimareenka:</u> Cilladsheegid. Cabitaanka baariyum (daawada) waxaa lagu qaataa afka oo wuxuu dahaaraa hungurimareenka. Baarista Xubnaha Dhaqaaqa (raajada) ayaa la sameeyaa isla marka la laqo baariyum, taas oo muujineysa cadaadiska ama xannibaadda hunguriga.
- <u>Cardiac Computed Tomography (Sawirka Xubnaha Gudahooda ama CT) ama Magnetic Resonance Imaging (Sawirka Xubnaha Waaweyn ama MRI):</u> Waxaa loo isticmaalaa in lagu ogaado cilladaha buundada halbowlaha iyo halbowleyaasha aan caadiga ahayn ee sambabka.


© 2012 The Children’s Heart Clinic

**Xididka Wareegsan**
Vascular Ring

- <u>Uultarasawn:</u> Waa caawimaad lagu xaqiijinayo cilladsheegidda wareegga xididka dhiigga iyo xanuunnada kale ee wadnaha ee lagu dhasho, haddii laga helo.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Carruurta laga helo wareegyada xididdada waa calaamad la'aan oo uma baahna qalliin.
- Dhallaanka iyo carruurta leh calaamado fudud waxay u baahan yihiin taxadar ah siyaabaha quudinta iyo qiimeyn degdeg ah iyo daaweynta infakshanka neefmareenka.
- Wakhtiga qalliinka waxaa lagu go'aamiyaa sida xanuunku u daran yahay calaamadaha la socda.
- Carruurta waa in si taxaddar leh loo maareeyo neefsashada ah xilliga qalliinka ka dib.

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:**

- Haddii ay daran yihiin calaamadaha neefsashada qalliinka ka hor, waxay qaadan kartaa ilaa hal sano in la xalliyo sharqanta neefsashada.
- Dhimashada qalliinka waa wax aan dhicin.
- Rajada nolosha oo caadi ah iyo korriinka carruurta aan qabin cillado kale oo lagu dhasho.
- La-socoshada wadnaha oo joogto laga dhigo ilaa 5 sano ka dib qalliinka ka dib haddii uusan ilmuhu qabin xanuun kale oo ah wadnaha.


© 2012 The Children's Heart Clinic